

Codbixiyeyaasha dalka dibadiisa iyo kuwa adeegga

Tilmaamaha Xirmooyinka Warqadda Codbixinta

Is diyaari

Waxaad u baahnaa doontaa:


- Warqaddaada codbixinta
- Qalin
- Sharooto fasiix ah (ikhtiyaari)
- Bakhshad (ikhtiyaari)

Xirmooyinka warqaddaada codbixinta beddelka ah waxaa ku jiri doona:

- Xaashida bayaanka iyo saxiixa
- Xaashida lifaaqa ee ikhtiyaarka ah
- Xaashida bakhshadda ee la jaran karo

1 Diyaari xirmooyinka warqaddaada codbixinta

1. Daabac xirmooyinka warqaddan codbixinta. Muhiim! Markaad warqaddaada codbixinta daabacayso, hubi inaad doorato dookha ah "fit to page" (ku habboon bogga) si dhammaan dhererka warqadda codbixinta loo daabaco.
2. Saxiix oo ku qor taariikhda xaashidaada Bayaanka iyo saxiixa.
3. Xirmooyinka warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay isugu habee sida tallaabooyinka hoos lagu muujiyay ay isugu xigaan:
 - a. Xaashida bayaanka iyo saxiixa
 - b. Xaashida lifaaqa ee ikhtiyaarka ah
 - c. Warqaddaada codbixinta ee lagu codeeyay



2 Soo celi warqaddaada codbixinta

Waxaa jira saddex hab oo aad warqaddaada codbixinta ku soo celin karto.

Ikhtiyaarka 1: Iimeel/Fakis

Waxaad xirmooyinka warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay ku soo celin kartaa iimeel ama fakis ahaan maalin aanan ka dambeyn 8 p.m. (Wakhtiga Baasifigga) ee Maalinta Doorashada.

Si aad warqaddaada codbixinta iimeel ugu soo dirto:

1. Iimeel ugu dir xirmooyinka warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay adigoo ku dhejinaaya iimeelka halka return.ballot@kingcounty.gov. Waxaad sawir fasiix ah oo la arki karo ka qaadi kartaa bogga xirmooyinka warqaddaada codbixinta adigoo isticmaalaya kaamarad dhigitaal ah ama taleefan gacan oo kaamarad leh.
 - Ha soo dirin linki/isku xire ama gal la zib gareeyay (zipped folder).
 - Ha dhaafin caddadka cabbirka qiyaasta faylka 10MB.

Si aad warqaddaada codbixinta fakis ugu dirto:

1. Fakis ugu dir xirmooyinka warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay halka **206-296-4499**.

Ikhtiyaarka 2: Boostada

Ku rid xirmooyinka warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay bakhshad adigoo isticmaalaya Xaashida Bakhshadda ee La Jaran Karo sida lagu faray. Taariikhda aad ku muujisay bayaanka codbixiyaha ayaa loo tixgeliyaa inay tahay taariikhda boostada lagu soo dirayo waana inaysan ka dambeyn Maalinta Doorashada. Warqaddaada codbixinta waa in la helo maalin aanan ka dambeyn May 1, 2025, maalinta ka horeysa shahaadaynta doorashada.

Ikhtiyaarka 3: Sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta

Ku rid xirmooyinka warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay bakhshad adigoo isticmaalaya Xaashida Bakhshadda ee La Jaran Karo sida lagu faray. Uma baahnid shaabadda boostada si aad warqaddaada codbixinta ugu soo celiso sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta.

Booq www.kingcounty.gov/elections si aad u hesho sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta.

i Raad-raac warqaddaada codbixinta oo akhri buug-yaraha codbixiyeyaasha.

Ka raad-raac horusocodka warqaddaada codbixinta goobo badan adigoo isticmaalaayo Raad-raaca Warqadda Codbixinta oo ka akhri buug-yaraha codbixiyeyaasha webseedkeena: kingcounty.gov/elections



Codbixiyeyaasha dalka dibadiisa iyo kuwa adeegga

Xaashida Bayaanka iyo Saxiixa

Tilmaamaha

Buuxi tallaabooyinka 1-3 ee hoose. Xaashidaan waa in la saxiixaa, taariikhdana lagu qoraa iyo waa in lala soo celiyaa warqaddaada codbixinta.

1 Akhri bayaanka

Waxaan ku dhaaranayaa ama aan xaqiijinayaa, anigoo ogsoon in dhaar beeneedu ay ganaax tahay, in aan ahay:

- Muwaadin Mareykan ah;
- Degane ku nool gobolka Washington;
- Ugu yaraan ah 18 sanno jir maalinta doorashada, ama ah 17 sanno jir xilliga ay dhacayso doorashada hordhaca iyo 18 sanno jir ah marka la gaaro maalinta doorashada guud ee dhacda bisha Nofeembar;
- Ka codbixinaya doorashadaan hal mar oo keliya, oo aan ka codeynin xukun kale oo ka tirsan dalka Mareykanka;
- In aanan laygu haynin xabsi guud oo hoos taga xukunka Waaxda Asluubta ee gobolka Washington xukun dambi-weyn awgeed, iyo aanan iminka xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn oo federaal ah ama mid ka dhacay gobolka Washington dibadiisa;
- Laygama mamnuucin codbixinta amar maxkamad awgeed;
- Waxaan ogsoonahay in saxiixa been-abuurku uu yahay sharci daro ama in qof kale loo codbixiyo iyo isku day codbixin iyadoo lagaa mamnuucay, isku day codbixin in ka badan hal mar, ama in si been-abuur ah loo saxiixo bayaankan waa dambi-weyn oo lagu mutaysan karo xukun xabsiga ugu badan oo ah ilaa iyo shan sanno, ganaaxa ugu badan oo gaaraya ilaa iyo \$10,000, ama labadaba; iyo
- Waxaan ogsoonahay in saxiixa ku qoran bayaankan la barbar dhigi doono saxiixa (yada) ku jira diiwaanka diiwaan gelinta codbixiyaha.

2 Buuxi macluumaadkaaga codbixiyaha

Waa inaad bixisaa macluumaadkaaga codbixiyaha si warqaddaada codbixinta loo tiriyo. Goobaha oo dhan waa loo baahan yahay.

Magaca hore	Dhexe	Magaca dambe	Taariikhda dhalashada (bisha/maalinta/sannadka)
Ciwaanka deganaanshaha		Magaalada	Zib-ka
Ciwaanka boostada		Magaalada	Zib-ka

Macluumaadka ku qoran foomkan looma isticmaali karo si aad u cusboonaysiiso macluumaadkaaga codbixiyaha. Fadlan booqo votewa.gov si aad wax uga beddesho diiwaan gelintaada.

3 Saxiix oo taariikhda ku qor

Waa inaad saxiixdaa oo aad taariikhda ku qortaa si warqaddaada codbixinta loo tiriyo.

X _____ / _____ / _____
saxiixa codbixiyaha (loo baahan yahay) taariikhda (bisha/maalinta/sannadka)

iimeel ama taleefan lambar (*ikhtiyaari, keliya haddii ay arrin ka jirto dhinaca saxiixaaga*)

Haddii aadan awoodin inaad saxiixaaga qorto, calaamad ku samee aagga saxiixa ee kore. Markaad calaamadaynayso waa in laba qof oo markhaati ah ay goob joog yihiin oo iyagana saxiixa halka hoose. Ma isticmaali kartid awoodda qareenka si aad qof kale ugu saxiixdo.

saxiixa markhaatiga 1aad

saxiixa markhaatiga 2aad



Haddii aadan saxiixin oo aadan taariikhda ku qorin waxay burinnaysaa warqaddaada codbixinta.

ku sii soco Xaashida Lifaafa ee Ikhtiyaarka ah



Abriil 22, 2025
Doorashada Gaarka ah
Degmada King, Washington



Waxaad boggan ku soo celin kartaa Doorashooyinka Degmada King, laakiin looma baahna.

Codbixiyeyaasha dalka dibadiisa iyo kuwa adeegga

Xaashida Lifaafa ee Ikhtiyaarka ah

Tani waa maxay?

Xaashidaan waa ikhtiyaari oo waxay warqaddaada codbixinta ka dhigaysaa mid qarsoodi ah marka xirmooyinka warqaddaada codbixinta ay soo gaarto halka Doorashooyinka Degmada King. Fadlan ogow warqadaha codbixinta ee la daabaco iyadoo la isticmaalaayo habka oonleena ayaa laga yaabaa inay qarsoodi yar yihiin marka shaqaalaha Doorashooyinka ay habeynayaan.

Tilmaamaha

Markaad dhammayso ku codeynta warqaddaada codbixinta oo aad saxiixdo bayaanka, waxaad diyaar u tahay inaad u dhaqaaqdo xagga tallaabada xigta. Ku noqo xagga Tilmaamaha Xirmooyinka Warqadda Codbixinta, tallaabada 2.

ku noqo xagga Tilmaamaha Xirmooyinka Warqadda Codbixinta



Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku tabarruceyaasha dhaqaale ee musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga ee gobolka iyo deegaanka:

Guddiga Kashifaadda Dadweynaha

www.pdc.wa.gov

Toll Free: 1 (877) 601-2828



Macluumaadka Xiriirka

taleefan: 206-296-VOTE (8683)

1-800-325-6165

TTY Relay: 711

iimeel: elections@kingcounty.gov

oonleen: kingcounty.gov/elections

Abriil 22, 2025

Doorashada Gaarka ah
Degmada King, Washington

Codbixiyeyaasha dalka dibadiisa iyo kuwa adeegga

Xaashida Bakhshadda ee La Jaran Karo

Isticmaal xaashida bakhshadda ee la jaran karo haddii aad dooratay fursadda ah inaad warqaddaada codbixinta ku soo celiso boostada.





Waa maxay kan?

Isticmaalka sawirka hoose waxay xirmooyinka warqaddaada codbixinta u aqoonsanaysaa warqad boosto ee doorashooyinka rasmiga ah. Muhiim! Haddii aad agabka warqaddaada codbixinta ku soo celinayso boostada sawirka bakhshadda ee hoose ayaa ku siinaya boosto bilaash ah oo lacagteeda hore loo bixiyay iyo dirid heerka koowaad.

Tilmaamaha

1. Ka jar sawirka bakhshadda ee hoose halka ay ku taallo xariiqaha dhibicda ah.
2. Sawirka ku dheji bakhshad. Ka taxaddar inaad sharooto ku daboosho aagga shaabadda boostada ee halka geeska kore ee midigta bakhshaddaada.
3. Isku laab xirmooyinka warqadda codbixinta ee aad buuxisay (xaashida bayaanka iyo saxiixa, xaashida lifaaqa warqadda codbixinta ee ikhtiyaarka ah, iyo warqadda codbixinta) oo ku dhex rid bakhshadda.
4. Isku xir bakhshadda oo boostada ku dir.





**U.S. Postage Paid
39 USC 3406**

PAR AVION



OFFICIAL MAIL BALLOTING MATERIAL - FIRST-CLASS MAIL

NO POSTAGE NECESSARY IN THE U.S. MAIL - DMM 703.8.0

**King County Elections
919 SW Grady Way, Suite 200
Renton WA 98057-2905
USA**